



Goobaha dadka u furan ‘open house’ ee loo qorsheeyay carruurta dhigan doonta dugsiga barbaarinta iyo qoysaskooda

Ma haysataa ilmo da’diisu tahay 5 jir ama ka weyn oo diyaar u ah in uu dayrta bilaabo dugsiga hoose? Ka dib fiiri Goobaha Dadka u Furan ee Kindergarten oo bilaabmi doonta bishan isla markaana guud ahaan degmada ka socon doona ilaa Maajo. Kaalay oo la kulan macallimiinta iyo maamulayaasha dhismaha mustaqbalka ee ilmahaaga.

PPS waxay ardayda u damaanad qaadaysaa boos ay ka helaan dugsiga xaafadooda, taasi oo aad ku heli karto adiga oo isticmaalaya [Khariidadan degmada](#). PPS waxay sidoo kale bixisaa dugsiyada la kala dooranayo ee diirada la saarayo oo ah taariikhda, sayniska iyo farshaxanka iyo sidoo kale barnaamijyada habka waxbarid ee labada luqadood. Si aad waxyaalo dheeraad ah uga ogaato Goobaha Dadka u Furan ee Kindergarten iyo sida loo codsado bakhtiyaanasiibka doorashadda dugsiga, booqo bogga internet-ka Ku xirmida Dugsiga Barbaarinta Carruurta [Connect to Kindergarten](#).